

Liiska jeegareynta kormeerida guriga

Wakhti kasta oo aad kormeerto guri kiro ah, soo qaado nuqulka liiskan jeegareynta. Markaad bilowdo kormeerida ku qor sax ama iskutallaab qaybta cinwaanka ama ku same qoraal gaaban. Waxaad isticmaali kartaa tan si aad isu barbardhigto guryaha ka hor intaadan go'aanka sameyn.

	cinwaanka	cinwaanka	cinwaanka
Guriga gudhiisa			
Gurigu ma leeyahay gaas? (Gaasku waa ka raqiisan yahay korontada)			
Ma leeyahay kuleyl ku filan? (xilliga qaboobuhu Fiktoriya waa qabow)			
Guriga ma lagu sameeyey waxaan qabowga soodeynaynin?			
Miyey jiraan qalabka qiiqa sheega? (Sharci ahaan dhammaan guryuhu WAA IN lagu rakibaa qalabka qiiqa)			
Ma sahlan tahay in guriga laga baxo lacala haddii dab dhaco?			
Nidaamka biyaha kulul ma ku badan yahay guriga?			
Ma fiican yihiin caddaadiska iyo tayada biyuhu?			
Cunta kariyaha iyo ovenku si wanaagsan ma u shaqeynayaan?			
Jikada ma ku jirtaa marawaxada qiiqa saartaa?			
Ma ku jirtaa marawaxada xawada saartaa musqusha iyo qubeyskaba?			
Ma jiraa meel qasaalada la dhigo?			
Ma leeyahay sahanka qasaasha oo tuunbooyin leh?			
Ma leeyahay meel ku filan oo alaabada la dhigto iyo meesha dharka lagu wadho?			
Daaqaduhu ma leeyihiin wax daboolka sida daahyo iyo qariyayaasha (blinds)?			
Haddii ay jiraan daaqado waa weyn, ma lagu rakibay muraayada ammaanka?			
Daaqaduhu ma u furmaan una xirmaan xi hagaagsan?			
Daaqaduhu ma leeyihiin furayaal lagu xiro?			

Albaabka hore iyo ka danbe ma leeyihiin qufulo lagu xidho?			
Albaabada iyo daaqaduhu ma leeyihiin shabaga dukhsiga? (xaggaaga Victoria wuxuu keenaa dukhsi iyo kaneeco)			
Ma jiraa albaabka nabadgelyada?			
Taleefanku ma xiran yahay?			
Ma jirtaa anteenada TV bareesada la geliyo?			
Miyey jiraan bareesooyinka dabka oo ku filan?			
Ma jiraan nalal kufilan?			
Gurigu ma fulinayaa wixii baahi khaas ah oo dhaqameed ama diimeed laga yaabo inaad leedahay?			
Gurigu xaalladiisa guud ma wanaagsan tahay? (sagxada waxa ku sameysan, farshaxanka rinjiga iwm ma yihiin kuwo xaalladoodu fiican tahay?)			

Guriga bannaankiisa

Ma jirtaa anteenada TV? (Tani badanaa waxay ku xiran tahay saqafka guriga)			
Gurigu ma leeyahay jardiin? (haddii ay saa tahay, ma awoodi doontaa inaad ilaaliso?)			
Ma ku filan yihiin albaabada iyo ganjeelooyinku?			
Haddii aad gaadhi heysato, miyey jirtaa meel ku haboon gaadhi dhigashada?			
Ma u dhow yahay gaadiidka dadweynaha, dukaamada, dakhtarka iwm?			
Wax kuu haboon miyaa inaad u safarto dugsi, jaamacada ama/iyo shaqada?			
Miyuu jiray gaadiid badan ama buuq kale oo xaafada ah oo ku dhibi kara?			
Ma dalbaneysaa gurigan?			
Magaca wakiilka guriga			
Taariikhda codsiga			

➔ Haddii mulkiiluhu ama wakiilka gurigu uu ogolaado inuu sameeyo wixii wax ku darid ah ama wax ka bedelida guriga (sida ku rakibida shabaqa duqsiga ama kuleyliyaha) hubi in tan la sameeyo ka hor intaadan saxiixin heshiiska kireysiga (ijaarka) ama hubi in iyadoo qoraal ah in lagu daro heshiiska kireysiga.

Wixii macluumaad dheeraad ah taleefan u dir Khadka Tallada Ururka Kireystayaasha (Tenants Union Advice Line) ☎ (03) 9416 2577.